JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |

# XEERKA ASAASKA KOMIISHANKA MAAMUL-WANAAGA
# XEER LR.58/2012

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com

*Sannadka 2022*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**THE PRESIDENT**

REF. JSL/M/XERM/249-1581/022013

DATE 03/02/13

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0301/022013

## Dhaqan-galka Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga
## Xeer Lr. 58/2012

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

**Markuu Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markuu Arkay:** Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markuu Arkay:** Go'aanka Golaha Wakiilada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-20/585/2013 ee ku taariikhaysan 15/01/2013 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Hay'adda Komishanka Maamul Wanaaga Xeer Lr. 58/2012;

**Wuxuu Soo Saaray**

Dhaqan-galka Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga Xeer Lr. 58/2012 ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Republic of Somaliland
President

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaran
Qoraalkan waxa laga Diiwaangeliyey
Xafiiska Maanta 04/02/13
Lambarka: 64
Saxeex:

**Ujeedo: - <u>Go'aanka Ansixinta Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga Xeer Lr.58/2012</u>**

## GOLAHA WAKIILADA JSL

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkey:** | **Qodobka 39aad, 77aad iyo Qodobka 113aad** ee Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland. |
| **Markuu Darsay:** | **Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga** ee ay soo gudbiyeen **Golaha Wasiirada** Jamhuuriyada Soomaaliland. |
| **Isagoo Ogsoon:** | Ahmiyada ay leedahay in la abuuro hab-dhaqan maamul wanaagsan iyo ummad ka nadiif ah dhamaan noocyada musuqa, lana soo cesho karaamada iyo siyaadada (Integrity and Sovereignty of the State) si loo helo qaranimo taam ah iyo umad xalaal miirad ah. |
| **Markuu Tixgaliyey:** | Taladii Golaha Guurtida iyo dhamaan daneeyayaasha kale ee uu khuseeyo xeerkani . |
| **Markuu Ku Qancey:** | In baahi loo qabo abuurida Komishan madax banaan oo ka hortaga lana dagaalama musuq-maasuqa iyo karti darada hay'adaha dawlada, isla markaana kula xisaabtama toosinta maamulka oo horseed u noqda taaba-gelinta, iyo dib-u-habeynta nidaamka maamul wanaag. Isla markaana sahasha in si hufan looga midho dhaliyo horu-marka iyo hiigsiga Qaranimadda Jamhuuriyada Soomaaliland ee ku cad Qorshaha Horumarinta Qaranka "National Development Plan". |
| **Markuu Aqoonsadey:** | Danta iyo maslaxadda qaranka Jamhuuriyada Soomaaliland si loo gaadho in ay lagama maarmaan tahey in la helo komishan dejiya heerka habsimo ee laga rabo hay'ad kasta oo dawladda ka mid ah, kuna daba-gala fulitaankiisa. |

| | |
|---|---|
| **MARKUU U CODEEYEY:** | Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga **Xeer Lr. 58/2012 Kal-fadhigii 20aad fadhigiisii 10 aad taariikhduna ku suntanayd 07/01/2013** oo ay goob joog ahaayeen **(44)** Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha **Golaha Wakiilada.** |

# WUXUU

Cod aqlabiyadd ah oo afartan iyo kaw mudane **(41 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga Xeer Lr. 58/2012,** halka **laba (2) mudane** ka aamuseen , cid diidayna aanay jirin **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caaddada ah.

## ALLAA MAHAD LEH

***C/risaaq Siciid Ayaanle***
***Xoghayaha. Guud ee Golaha Wakiilada***

***Baashe Maxamed Faarax***
***K/simaha Gudoomiyaha Golaha Wakiilada ahna G/Xigeenka 1aad***

<u>GOLAHA WAKIILADA JSL</u>

**Markuu Arkey:** **Qodobadda 53aad, 77aad iyo qodobka 113aad** ee Dastuurka Jamhuuriyada Soomaaliland.

**Markuu Arkey:** **Xeerka Komishanka Maamul-Wanaaga** ee ay soo gudbiyeen **Golaha Wasiirada JSL**

**Markuu Dersey:** Ahmiyada ay leedahay in la abuuro hab-dhaqan maamul wanaagsan iyo ummad ka nadiif ah dhamaan noocyada musuqa, lana soo cesho karaamada iyo siyaadada (integrity and s Sovereignty of the state) qaranimo iyo umad xalaal miirad ah.

**Markuu Tixgaliyey:** Talooyinkii Golaha Guurtida iyo dhamaan Talooyinkii kale ee daneeyayaasha uu khuseeyo xeerkani.

**Markuu Ku Qancay:** In baahi loo qabo abuurida Komishan madax banaan oo ka hortaga lana dagaalama musuq-maasuqa iyo karti darada hay'adaha dawlada, isla markaana kula xisaabtama toosinta maamulka kaas oo horseed u noqda toosinta, taaba-gelinta, iyo dib-u-habeynta maamul wanaaga, hufnaanta, banyaalnimada si looga midho dhasho horu-marka iyo hiigsiga Qaranka Jamhuuriyada Soomaaliland ee ku cad Qorshaha Horumarinta Qaranka "National Development Plan".

**Markuu Aqoonsadey:** Danta iyo maslaxada qaranka Jamhuuriyada Soomaaliland si loo gaadho in ay lagama maarmaan tahey in la helo komishan dejiya heerka habsimo ee laga rabo hay'ad kasta oo dawlada ka mid ah, kuna daba-gala fulitaankiisa.

Waxa Uu Soo Saarey:

**Xeerka Aasaaska Komishanka Maamul-Wanaaga Xeer Lr: 58/2012**

# TUSMADDA XEERKA


TILMAAMAHA GUUD .......... 4

Qoddobka 1aad .......... 4

Erey Bixinta Xeerka .......... 4

Qoddobka 2aad .......... 4

Magac-dhawga Xeerka .......... 4

Qoddobka 3aad .......... 4

Fasiraadda Xeerka .......... 4

Qoddobka 4aad .......... 4

Komiishanka Maamul Wanaaga .......... 4

QAYBTA 2AAD .......... 4

AWOODAHA IYO SHURUUDAHA KOMISHANKA .......... 4

Qoddobka 5aad .......... 4

Shuruudaha Xubnaha Xafiiska Komiishanka .......... 4

Qofka xubinta ka noqonaya Komiishanku:- .......... 4

Qoddobka 6aad .......... 5

Shaqada iyo Waajibaadka .......... 5

Qoddobka 7aad .......... 5

Magacaabista iyo Xilka qaadista Xubnaha Komishanka .......... 5

Qoddobka 8aad .......... 5

Muddada Xilka Komishanka .......... 5

Qoddobka 9aad .......... 6

Xarunta Komiishanka .......... 6

Qoddobka 10aad .......... 6

Dhaarta Xubnaha Komiishanka .......... 6

Qoddobka 11aad .......... 6

Bannaanaanshaha Xubinimada Komiishanka .......... 6

Qoddobka 12aad .......... 6




XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Warbixin Sanadeedka Komishanka ........ 6

Qoddobka 13aad ........ 6

Xilka iyo Waajibaadka Guuddoomiyaha ........ 6

Qoddobka 14aad ........ 7

Xilka iyo Waajibaadka Guddomiye ku xigeenka ........ 7

Qoddobka 15aad ........ 7

Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud ........ 7

Qoddobka 16aad ........ 7

Mushahrooyin iyo Gunnooyinka ........ 7

Qodobka 18aad
Xeerka loo Adeegsanayo Dembiyada Musuqmaasuqa ........ 8

Qodobka 19aad
Oogidda Dembiyada Musuqmaasuqa ........ 8

Qodobka 20aad
Dhaqan-galka Xeerka ........ 8



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA KOWAAD

## TILMAAMAHA GUUD

### Qoddobka 1aad

### Erey Bixinta Xeerka

**Komiishanka:** waxa loola jeedaa xubnaha komiishanka Maamul-wanaaga Jamhuuriyada Somaliland oo ah hay,adda uu xeerkani abuurayo kana masuul ah dhamaan awoodaha uu xeerkani tilmaamayo;

**Guddoomiyaha:** waxa loola Jeedaa Guddoomiyaha Komiishanka Maamul Wanaaga;

**Agaasimaha:** Waxa loola jeeda Agaasimaha Guud ee Komiishanka Maamul-wanaaga

**Hanti-Dhawre:** waxa loola jeedaa Hantidhawrka Guud ee Qaranka;

**Xeerka:** Waxa loola Jeeda Xeerka Aasaaska Komishanka Maamul -wanaaga.

### Qoddobka 2aad

### Magac-dhawga Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa **"Xeerka asaaska Komiishanka Maamul Wanaaga Xeer Lr: 58/2012"**

### Qoddobka 3aad

### Fasiraadda Xeerka

Wixii aanu Xeerkani si cad u qeexin, waxaa loo fasirayaa si waafaqsan shareecada diinta islaamka, Dastuurka dalka iyo xeerarka kale ee la xidhiidha xeerkan iyo hadii loo baahdo Xeerarka Caalamiga ah.

### Qoddobka 4aad

### Komiishanka Maamul Wanaaga

Xeerkan waxa lagu aasaasay Komiishanka Maamul Wanaagga, oo leh shakhsiyad qanuniya (legal personality)

## QAYBTA 2AAD

## AWOODAHA IYO SHURUUDAHA KOMISHANKA

### Qoddobka 5aad

### Shuruudaha Xubnaha Xafiiska Komiishanka

Qofka xubinta ka noqonaya Komiishanku:-

1. Waa inuu yahay muwaadin reer Soomaaliland ah.
2. Waa inuu muslim yahay, asluub wanaagsan bulshada ku dhex leeyahay.
3. Waa in Da'diisu aanay ka yaraan soddon (30) sanadood.
4. Waa inuu waxbarasho heer jaamacadeed haystaa, ama wax u dhigma.
5. Waa inuu lahaadaa waayo aragnimo Todoba (7) sanadood ah, oo la xidhiidha arimaha hogaamineed iyo mid maamulba.
6. Waa in aanu ku dhicin xukun Maxkamaddeed oo kama denbays ah oo lagu muteysan karo ciqaab gaadhaysa 3 sanadood 5-tii sano ee u danbeeyey.
7. Waa inuu ku sifoobay xilkas, Akhlaaq wanaag iyo Dhaqan toosan, yahayna shakhsi leh sifo Dhexdhexaadnimo, Karti, Hufnaan iyo Daacadnimo.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qoddobka 6aad

## Shaqada iyo Waajibaadka

Shaqada iyo Waajibaadka Komishanka Maamul Wanaaga waa:

1. U madax bannaanaan yahay xil-gudashadiisa, waxaana reeban talaabo kasta oo lagaga leexinayo xil-gudashadiisa.
2. Dersidda iyo qiimeynta nidaamka maamul ee Hay'adaha Dawladda iyo ka soo talo bixinta habka lagu toosinayo.
3. Ku wacyi-gelinta nidaamka toosan Hay'adaha Dawladda.
4. Kormeeridda hab-sami-u-socodka maamulka.
5. Baadhista iyo dabagalka galdaloolooyinka maamul.
6. Hubinta hirgelinta qorshe hawleedyadda Hay'adaha Dawladda.
7. Soo jeedinta barnaamijyada lagu horumarinayo maamul wanaagga
8. Baadhista ku takrifalka awoodda maamul.
9. Hubinta iyo dabagalka ku dhaqanka saacadaha shaqada, isagoo la kaashanaya Hay'adaha ay khusayso.
10. U gudbinta Hay'adaha sharciga wixii faldambiyeedda ee ka soo baxa baadhista.

## Qoddobka 7aad

## Magacaabista iyo Xilka qaadista Xubnaha Komishanka

1. Komishanku waxa uu ka kooban yahay Shan (5) xubnood oo lagu soo xulay shuruudaha ku cad Qoddobka afraad (4aad) ee Xeerkan.
2. Xubnaha Komiishanka waxa magacaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland waxana cod hal dheeriya ku ansixinaya Golaha Wakiilada
3. Xubnaha Komishanka waxaa xilka ka qaadi kara Madaxweynaha JSL.
4. Guddoomiyaha iyo ku-xigeenka guddoomiyaha xubnaha ayaa iska dhex dooranaya, waxaanay ku ansaxayaan cod hal dheer tirade xubnaha komishanka.
5. Komishanku waxa uu yeelanayaa Agaasime guud oo Madaxweynuhu magacaabo, xilkana ka qaadi karo, marku la tashado komishanka.
6. Komishanku waxa uu u shaqaalayn karaa shaqaale si waafaqsan nidaamka shaqaalaynta hay'adda shaqaalaha dawlada, marka uu guddomiyuhu u arko lagama maarmaan gudashada xilka komishanka. Waxa xilka lagaga qaadi karaa taloobo anshax marineed si waafaqsan xeerka shaqaalaha dawlada.
7. Komishanku wuxuu yeelan karaa guddi la'talineed markii loo baahdo oo tiradeeda iyo mudada ay shaqaynayaanba komishanku go'aaminayo.

## Qoddobka 8aad

## Muddada Xilka Komishanka

1. Muddada Xilka Komishanka waa (4) Afar sano, oo ka billaabanaysa Maalinta Xilkaas loo dhaariyo.
2. Xubin ama xubno ka mida ah Komishankii hore, Madaxweynuhu Mar-labaad wuu magacaabi karaa isagoo ku Qiimeynaya Wax-qabadkiisa shaqo.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qoddobka 9aad
## Xarunta Komiishanka

Komiishanka waxay xaruntiisu noqonaysaa Hargeisa, caasimada J.S.L, sidoo kale Komishanku waxa uu go'aansan karaa in uu gobolada kale ka furto xafiisyo, iyada oo ku xidhnaan doonta awoodooda dhaqaale iyo baaxadda hawleed.

## Qoddobka 10aad
## Dhaarta Xubnaha Komiishanka

1. Madaxweynaha ayaa isugu yeedhaya xubnaha Komishanka, muddo 30 cisho gudahood ah marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, fadhigooda ugu horeeyana waxaa si xubin-xubin ah ugu dhaarinaya xubnaha Komishanka Gudoomiyaha Maxkamada Sare.
2. Dhaarta xubnaha Komishanku waxa ay noqonaysaa; ***"Waxaan ILAAHAY ugu dhaartay inaan mas'uuliyadda Komishanka u gudan doonno si caddaalad ah oo aanan ugu kala eexan doonin muwaadiniinta Somaliland iyo cid kasta oo shaqo u haysa Qaranka, xafidi doonana sirta Qaranka".***
3. Xubnaha Komishanku magacaabista ka dib si buuxda ayay u bilaabayaan hawsha xafiiska.

## Qoddobka 11aad
## Bannaanaanshaha Xubinimada Komiishanka

Xubinimada Komishanku waxay ku bannaanaan kartaa:

1. Xil ka qaadista ku xusan qodobka 7aad ee xeerkan.
2. Is-casilaad qoraal ah oo xubintu u gudbiso Madaxweynaha, ogaysiina siiso xubnaha kale ee Komishanka.
3. Geeri ku timaada.
4. Haddii xubinta ay ku cadaato dambi xadhigiisu gaadhayo muddo sadex (3) sano ah ama ka badan.
5. Haddii xubintu u gudan kari waydo xilkeeda sababo caafimaad darro awgeed oo ay cadeeyeen guddi dhakhaatiir ah oo ka diiwaangashan wasaarada caafimaadka.
6. Haddii xubintu ka maqnaato afar kulan oo xidhiidha ama 45 cisho gudahood oo is xiga shaqada Komishanka fasax la'aan awgeed.

## Qoddobka 12aad
## Warbixin Sanadeedka Komishanka

1. Iyada oo ay tixgalinayaan ujeedoyinka Komiishanka ee ku qeexan Qoddobka (5aad) ee xeerkan, Komishanku waa inuu Madaxweynaha u soo gudbiyo warbixin dhammaystiran oo khusaysa waxqabadkoodii sannadkaas ugu danbeyna dhammaadka bisha February sannad walba.

## Qoddobka 13aad
## Xilka iyo Waajibaadka Guuddoomiyaha

Guddomiyaha oo ah madaxa komishanka wuxuu masuul ka yahay: -

1. Xilgudashada waajibaadka komishanka iyo habsami u adeegsiga awoodaha ku xusan xeerkan.
2. Maamullka guud ee komishanka iyo go'aan ka qaadashada anshaxmarinta shaqaalaha Komiishanka.
3. Waxa uu soo saari karaa wareegtooyin maamuleed si waafaqsan qoddobada maamulka guud, tababaradda, waajibaadka iyo masuuliyadaha xubnaha Komishanka iyo arrimihii kale ee uu u arko lagama maarmaan amma ku haboon maamul wanaagga hawlaha Komishanka iyo hubinta habsami u socodka hawlahooda.
4. Ku hadalka afka Komishanka, haddii aanu cid kale u igman.

5. Kormeerista, qiimaynta, toosinta shaqada Komiishanka iyo Go'aan qaadashada nidaamka shaqada Komiishanka.
6. Masuuliyada Guud ee ilaalinta iyo fullinta xeerkan.

**Qoddobka 14aad**

**Xilka iyo Waajibaadka Guddomiye ku xigeenka**

1. Ku simida maamulka Komiishanka marka uu maqanyahay Guddomiyuhu.
2. Waxa uu ka caawinaya gudoomiyaha habaynta hawlaha kala duwan ee shaqo.
3. Gudashada waajibaadka kale ee uu gudoomiyuha u igamaddo.

**Qoddobka 15aad**

**Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud**

Agaasimaha guud;

1. Waxa uu u xil saaranyahay hawl maalmeedka Komiishanka.
2. Waxa uu hoos yimaadaa Gudoomiyaha.
3. Waa madaxa shaqaalaha Komiishanka.
4. Waxa uu fullinayaa go'aamada komiishanka.
5. Waxa u si toos ah warbixinta u siinayaa Gudoomiyaha komishanka.

**Qoddobka 16aad**

**Mushahrooyin iyo Gunnooyinka**

Xubnaha Komiishanku waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan mushaharooyin iyo gunnooyinka lagama maarmaanka u ah gudashadashada hawshooda.

**Qodobka 17aad**

**Baadhista, Xaqiijinta iyo Warbixinaha la xidhiidha tibaaxaha maamul-xumada iyo wax-is-weydaarinta**

1. Komishanku markuu helo war tibaaxaya jiritaanka maamul-xumo ee ka jira hay'add dawladeed ama in mas'uul dawladeed ku kacay wax-is-weydaarin ama ku-takrifal hanti ummadeed ama awood dawladeed, wuxuu ku tallaabsanayaa hubinta sida ay dhab ahaan wax uga jiraan warkaas;
2. Haddii uu Komishanku ku qanco in maamul-xumada, wax-is-weydaarinta ama ku-takri-falka hantida ummadeed ama awoodda dawladeed ee la galay ay mudan tahay in cid maxkamad lagu hor-geeyo, wuxuu ku war-gelinayaa Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka si, isagoo raacaya Xeerka Hanti-dhawrka Qaranka, uu baadhis rasmi ah ugu sameeyo arrintaas, tallaabada sharci ee ku habboonna uu uga qaado.
3. Haddii ay Komishanka la noqoto in maamul-xumada, wax-is-weydaarinta ama ku-takri-falka hantida ummadeed ama awoodda dawladeed ee uu warkeeda helay aanay gaadhsiisneyn heer cid maxkamad lagu hor-geyn karo, wuxuu saxayaa dhalliilaha maamul ee jira iyo khaladaadka dhacay.
4. Hanti-dhawrka Guud ee Qaranku wuxuu Komishanka nuqul ka siinayaa natiijada baadhista arrin kasta oo uu ku soo war-geliyo Komishanku.
5. Haddii uu Komishanku ku qanci waayo natiijada baadhista ee Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka, wuxuu warbixin uu ku faahfaahinayo sababta uu ugu qanci waayey natiijada baadhista Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka u gudbinayaa Madaxweynaha.

### Qodobka 18aad

**Xeerka loo Adeegsanayo Dembiyada Musuqmaasuqa**

Wax-ka-qabashada fal-dembiyeedyada la xidhiidha musuqmaasuqa waxa ugu mudan in loo adeegsado Xeerka La-dagaallanka Musuqmaasuqa, wixii meel looga waayana waxa loo raacayaa Xeerka Ciqaabta Guud ee Somaliland.

### Qodobka 19aad

**Oogidda Dembiyada Musuqmaasuqa**

Fal-dembiyeedyada musuqmaasuq ee u sugma Hantidhawrka Guud waxa maxkamadaha awoodda u leh ka hor-oogaya Xeer Ilaalinta Guud.

### Qodobka 20aad

**Dhaqan-galka Xeerka**

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka ay golayaasha sharci dajintu ansixiyaan madaxweynuhuna saxeexo.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.

______________________

Baashe Maxamed Faarax
Ku-simaha Guddoomiyaha, ahna Gud ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada JSL.

______________________



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE